



# Daawooyinka Qaaxada Qarsoon (Latent TB): Daaweynta Qaaxada Qarsoon (3HP).

Waxaad qaadan doontaa daawadaada hal mar todobaadkii ilaa muddo 12 toddobaad ah.

Waxaad isku mar qaadan doontaa kiniinka toddobaadlaha ah ee aad qaadato, isla maalinta toddobaadka.

U sheeg dhakhaatiirtaada kale inaad daawo u qaadanayso qaaxada qarsoon (LTBI).



Waxaad qabtaa qaaxo qarsoon oo ah nooc ka mid ah caabuqa qaaxada. Ma qabtid cudurka qaaxada oo mana u gudbin kartid dadka kale. Daawadaan ayaa kaa caawin doontaa ka hortagga cudurka qaaxada ee firfircoon.



Wac kalkaalisadaada caafimaadka haddii aad qabto su'aalo ama waxyeello:


Daawada	Tirada kaniiniyada	Maalinta todobaadka
Isoniazid		Isniin Talaado Arbaco Khamiis Jimco Sabti Axad
Rifapentine		Isniin Talaado Arbaco Khamiis Jimco Sabti Axad
Pyridoxine (vit B6)		Isniin Talaado Arbaco Khamiis Jimco Sabti Axad



JOOJI qaadashada daawooyinkaaga isla markaaba oo WAC kalkaalisada cudurka qaaxada haddii aad qabto mid ka mid ah dhibaatooyinka hoose:

- Cunto yari ama oomateeg la'aan
- Calool xanuun ama calool kacsanaan
- Lalabbo ama matag
- Kaadida midabka koolaha u eg ama saxaro
- Maqaarka ama indhaha oo jalle noqdo
- Nabaro ama dhiigbax
- Finan ama cuncun
- Tabar dari daran ama daal
- Qandho wato
- Madax xanuun ama jir xanuun
- Dawaqaad
- Jidhidhico iyo kabuubyo gacmahaaga ama cagahaaga ah

**FIIRO GAAR AH: Waa CAADI haddii kaadidaada, candhuuftaada, ama ilmadaadu isku beddelaan midabka oranjiga ah. Muraayadaha lens-ka indhaha ayaa laga yaaba in ay wasakhoobaan ama midabkooda beddelmaan.**



### Tallooyin ku aadan qaadashada Daawooyinka Qaaxada Qarsoon (3HP)

- Samayso alaarm si uu ku xasuusiyo inaad qaadato daawadaada
- Ka codso xubin qoyska ama saaxiib inuu ku xasuusiyo
- La hadal dhakhtarkaaga haddii aad cabto khamri, khamrigu wuxuu keeni karaa waxyeelooyin kale
- U sheeg dhakhtarkaaga dawooyinka kale ee aad qaadato
- Weydii kalkaalisadaada haddii aad wax su'aalo ah qabto